



Visual Evidence for Victims

Adeegan oo dhammi waa bilaash
waana qarsoodi

Ma waxaa tahay dhibane dagaal guri?

Ma waxaa tahay dhibane fal dembiyeedka neceb?

Ma waxaa tahay dhibane dagaal rabshadaha galmo?

Ma lagu dhaawacay amase hantidaada wax ma la yeelay?

Diyaarna uma tihid inaad faldembiyeedkan Booliska u sheegtid? - Hayda Visual Evidence ee dhibanaha (VEV) ayaa ku caawinaya -

Dhibanayaal fal dembiyeed oo badan ayaa doorta inayan Booliska arrintan u sheegin , laakiin, dhibanaha ayaa laga yaabaa inay danaynayaan inay dhaawacooda ka diiwaangeliyaan wakaaladaha folantariga ah. Mashruuca VEV ayaa loo aasaasay si ay dadka ugu suuragasho inay xaqiiqada fal dembiyeedka ka diiwaangeliyaan wakaalad folantari ah, si uusan dhibanuhu u aadin Booliska. Wakaalado badan oo ku yaala nawaaxigaaga ayaa haysta shaqaale tababaran si ay u isticmaalaan kamarooyin la ogolaaday oy leeyihiin VEV si ay u diiwaangeliyaan dhaawacyada ama waxyeelada hantida.

- Dhaawac guud, jir burbur (bruises), nabaro, xagtimooyin, timo la jiidjiiday iwm.
- Waxyeelo Hanti, Daaqado la jejebiyey. Albaab wax la yeelay, qoraal cunfi leh (graffiti) iwm.

Waxaanu ku diiwaangelin doonaa maragkac sawir leh si aad u haysato caddeyn hadaad rabto inaad waqti dambe talaabo ka qaadid. Caddeyntan ayaa lagu xafidayaa meel qarsoodi ah si mustaqbalka loo isticmaalo. Caddeyntan waxaa loo isticmaali karaa maxkamadaha dembiyada ama dacwadaha sifilka ah, haddii dhibanuhu go'aansado inuu talaabo qaado. Dhinaca kale waxaa lagu kaydinaayaa galka (ugu badnaan 6 sano) ama waxaad dooran kartaa in la tirtiro sawiradaas . Waxaa lagu siin karaa kaalmo iyo warbixin si ay kaaga caawiso inaad go'aan ka gaadho waxaad rabtid.

Marna lagugu khasbi maayo in la diiwaangeliyo caddeyntaada –oggolaanshahaaga ayuun baan sawir qaadi karnaa . Si ixtiraam iyo is faham leh ayaannu dhibanayaasha ula dhaqmi doonaa . Waanu dareemi karnaa waana fahmi karnaa in laga yaabo in dhaawacaagu yahay mid noociisu yahay mid xasaasi ah. Wakaaladaha VEV cid kale uma sheegayso in aannu hayno sawiradaada . Haddii aad fal dembiyeedkaas u sheegtay Booliska uma baahnid inaad isticmaasho adeega VEV . Gobolka Dhexe ee West Midlands waxay leedahay 34 wakaaladood oo fidiya adeega VEV , Si aad u heshid war dheeri ah la xiriir Taageerada Dhibanayaasha 'Victim Support' ee: **0121 544 4336**.

Mashruucan waxaa maamula Taageerada Dhibanayaasha 'Victim Support', wixii warar dheeri ah fadlan la xiriir Lucy George- 0121 543 1722.

Warqadanyar waxaa bixiyey :
(Leaflet given out by:)